

Baahiyaha Bulshada ee Caafimaadka La xiriira (HRSN)

Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo inaad wax ka barato nafaqada?

Cuntada aan cuno waxay na siisaa tamar iyo nafaqo jirkeenu u baahan yahay si uu u koro, u xooganaado, si sax ahna ugu shaqeeyo. Wax ka barashada miraha, qudaarta, haruurka, borotiinka, iyo baruurta caafimaadka leh ee kala duwan waxay naga caawinaysaa inaan go'aano wanaagsan ka gaarno habdhaqankeena cuntada. Nutrition Services Benefits (Dheefteena Adeega Nafaqada) wuxuu kaa caawin karaa inaad wax ka barato waxa aad cunayso iyo sida ay u saamaynayaan jirkaaga.



Taageerooyinka nafaqada ee la heli karo:

- ▶ Waxbarashada nafaqada

Ma u qalmaa?

Si aad ugu qalanto taageerada nafaqada, waa:

- ▶ Inaad hadda xubin ka tahay OHP.
- ▶ Inaad awoodin inaad caawimaad ku hesho qaab kale.
- ▶ Inay kugu yar tahay ama aadan heli karin cuntada nafaqada leh
- ▶ Inaad qabto baahi caafimaad oo u qalanta.
- ▶ Inaad qabto xaalad nololeed oo u qalanta.

Sidee ayaan u codsan karaa taageerada nafaqada?



Haddii aad buuxiso habraacyada u qalmitaanka ee kor ku xusan, iskaan koodhka QR si aad u dhammeystirto **Social Needs Request Form** (Foomka Codsiyada Bulshada). Waxa aad sidoo kale wici kartaa **adeegga macmiilka CareOregon** lambarka **503-416-4100** ama iimaylka hrsncx@careoregon.org

Waxaad dukumiintigan ku heli kartaa luuqadaha kale, farta waawayn, farta indhoolaha ama nooca aad rabto. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad hesho turjubaan. Waxaad caawimaad ka heli kartaa turjubaan daryeelka caafimaadka qaabilsan oo xirfad u leh ama shahaado u haysta. Caawimadani waa bilaash. Wac 800-224-4840, TTY 711, ama u sheeg adeeg bixiyahaaga. Waanu aqbalaynaa wicitaanada dadka maqalka culus.

OHP-HSO-25-6428

careoregon.org

